# Waa maxay Damaanad-qaadka Akhriska ee Fasalka Sadexaad ee ohio?

Damaanada Akhriska Fasalka Saddexaad ee Ohio waa sharci ay tahay in dugsiyada Ohio ay raacaan laga bilaabo Fasalka Barbaarinta (Ka eeg Sharciga Dib loo eegay ee Ohio 3313.608).

Sharcigu wuxuu farayaa in dugsiyada:

1) **Qiimeeyaan xirfadaha akhriska** ee dhamaan carruurta ku jirta Fasalka Barbaarinta ilaa fasalka saddexaad ee bilowga sanad dugsiyeedka kasta.
2) **Qoraal ugu sheegaan qoysaska hadii ilmahaagu aanu wax u akhriyin sida la filayo heerka fasalka** iyadoo lagu salaynayo natiijooyinka imtixaanka. Sharcigu wuxuu si gaar ah uga hadlayaa faahfaahinta ay tahay inay dugsiyadu siiyaan qoysaska natiijada imtixaanka iyo qorshaha dugsigu ku doonayo in ilmaha lagu baro akhriska dugsiga.
3) **Siiyaan taageero gaar ah ilmaha, oo loo yaqaan adeegyada wax ka qabashada.** Adeegyadu waa inay ahaadaan kuwo u gaar ah baahida waxbarasho ee ilmahaaga haddii ay qiimaynta ka keeneen dhibco ka hooseeya heerka fasalka. Adeegyada wax ka qabashada waa in lagu saleeyaa **aqoonta akhriska**.
4) **Ku samee** **Qorshe Hormarinta iyo Kormeerka Akhriska** **60 maalmood gudahood** ee taariikhda ilmahaaga la siiyay imtixaanka akhriska bilawga sanadka. Macalinka fasalka ilmaha iyo waalidka/masuulka waa inay ka qaybqaataan samaynta qorshahan.

## Waa maxay sababta aan sharcigan ugu leenahay Ohio?

Caruurta aan wax akhrin heerka fasalka waxay ku adag tahay shaqada dugsiga haddii aysan helin caawimo dheeraad ah. Waxay afar jeer ugu dhowyihiin inay ka baxaan dugsiga sare.

## Maxaan samayn karaa si aan ilmahayga uga caawiyo inuu gaaro heerkooda akhriska?

Waalidiintu wax badan ayay samayn karaan si ay ilmahooda uga caawiyaan wax akhrinta maalin kasta!

- **Amaan heer akhriska ilmahaaga marar badan.** Waa mid aad u farxad badan marka ilmuhu horumariyo heerka akhriskooda. La wadaag iyaga sida aad ugu faraxsan tahay hormarkooda.
- **Sii ilmahaaga wakhti uu ku qaato xirfadaha akhriska iyo qoraalka ee ay hore ugu barteen** dugsiga. Waydii macalimiinta ilmahaaga xirfadaha saxda ah ee ay tahay inuu horumar ka sameeyo ilmaha.
- **Dhagayso ilmahaaga inta ay wax akhrinayaan.** Buugaag qaarkood, oo loo yaqaano buugaag akhriska baradka, ayaa aad ugu fiican ku celcelinta xirfadaha akhriska ee gaarka ah. Weydii macalinka ama shaqaalaha maktabada tusaalaha buugaagta la mid ah waxa ilmahaagu u baahan yahay inuu ku celceliyo.
- **Haddii ay khalad sameeyaan, ka codso inay ereyga si tartiib ah u akhriyaan mar kale.** Ilmahaagu dib ha u akhriyo jumlada si loo hubiyo inay fahmeen macnaha.
- **Waa caadi inaad ka nasato buugaagta haddii ilmahaagu u baahan yahay nasasho. Isku day warqadaha tijaabinta fahanka xarfaha, ciyaaraha kale ee waxbarashada iyo agabka, ama badalka ka shaqee qorista.** Waxbarashadu waxay ku dhici kartaa siyaabo badan oo kala duwan.
- **Ku kaydi buugaag iyo agabka wax lagu qoro dhamaan meelaha uu ilmahaagu wakhti ku qaato maalin kasta.**
- **Kala hadal macalinka ilmahaaga bishiiba mar** ama in badan wax ku saabsan sida wax akhrisku uga socdo guriga, oo weydii faahfaahin ku saabsan sida wakhtiga akhrisku u socdo dugsiga.

Ohio Statewide Family Engagement Center at The Ohio State University
Ohio Department of Education & Workforce

## Su'aalaha ay tahay in la waydiiyo macalinka

- **Waa maxay xogta uu dugsigu ururiyay** ee ku saabsan akhriska iyo qoraalka ilmahayga ee sanad dugsiyeedkan? Ma heli karaa nuqulka natiijooyinka? (Xusuusin ku socota waalidiinta: Haddii natiijadu tahay mid lagu jahawareerayo, waydii macluumaad dheeraad ah si ay kaaga caawiyaan inaad fahamto.)
- **Waa maxay [manhajka iyo agabka] loo isticmaalo ilmahayga** wakhtigooda akhriska iyo qoraalka?
- **Maxaa la sameeyaa wakhtiga akhriska iyo qoraalka ee dugsiga?** Ilmahaygu ma awoodaa inuu u fiirsado oo ka qaybqaato casharada? Ma u muuqdaan inay horumar samaynayaan? Hadii kale, maxaa kale oo dugsigu samayn karaa si uu si wanaagsan ugu caawiyo ilmahayga inuu wax barto?
- **Hadii ilmahaygu aanu wax horumar ah samayn bisha soo socota**, waa maxay fursadaha kale ee aan ku dhex leeyahay nidaamka dugsiga si aan u helo caawimo dheeraad ah ilmahayga?

## Ilmahaygu ma u gudbi karaa fasalka afraad haddii aanu ku gudbin Imtixaanka Akhriska?

Haa. Dugsiyadu waxa laga yaabaa in ay ku taliyaan in ardayda qaar ay ku celiyaan qayb ama dhammaan sannadkooda fasalka saddexaad sababta oo ah waxay buuxin waayeen dhibcaha heerka fasalka ee akhriska fasalka sadexaad. Ardaydu waxay wali geli karaan fasalka afraad iyadoo lagu salaynayo ka dhaafitaanka soo socda ee sharcigan.

## Ka dhaafitaanka ku noqoshada fasalka sadexaad

1) **Waalidiintu waxay codsan karaan in ilmahoodu u gudbo fasalka afraad**, ka dib markii ay kala hadleen macalinka ilmahooda iyo maamulaha dugsiga wax ku saabsan dhibcaha wax akhrinta iyo fursadaha ay ku helaan taageerada akhriska. Waalidiinta ayaa la siiyay awoodda ugu dambeysa ee go'aankan. Ka akhri wax badan ooku saabsan ka dhaafitaanka websaytka Xarunta Ka qaybgalinta Qoyska ee Gobolka Ohio.
2) **Ardayda hesha adeegyada Luuqada Ingiriisiga** mudo ka yar saddex sano oo taageerada Luuqada Ingiriisiga ah waxay u gudbi karaan fasalka afraad.
3) **Ardayda hesha adeegyada Luuqada Ingiriisiga** kuwaas oo ku qoran IEP-gooda in laga dhaafay.
4) **Ardayda hesha adeegyada Luuqada Ingiriisiga**kuwaas oo hore u helay dib u habayn degdeg ah ee akhriska mudo laba sano ah oo dugsiyeed ah laakiin aan weli wax akhriyin si waafaqsan heer fasalkooda.
5) **Ardayda helay taageero dheeraad ah ee akhriska mudo laba sanadood ah oo hore ugu soo celiyay heerka fasalka** ee Fasalka Barbaarinta ilaa Fasalka Sadexaad.
6) **Ardayda ku gaara dhibcaha gudbitaanka ee imtixaan kale** ee uu ansixiyay gobalka.

## Waa maxay taageerada la siiyo ardayda kadib fasalka sadexaad?

In kasta oo loogu yeero dammaanad-qaadka akhriska fasalka sadexaad, dugsiyadu waa inay sii wadaan bixinta taageerada ardayda aan wax akhrin ku karin heerka fasalka ilaa iyo inta laga gaarayo fasalka 12[aad]. Waydii dugsiga ilmahaaga taageerada ay siiyaan ilmahaaga ilaa ay wax akhrinayaan si waafaqsan heerka fasalka.

## Su'aalo miyaad qabta?

Iimayl ugu dir ThirdGradeGuarantee@education.ohio.gov.

**Janaayo 2025**